



## Atamyada iyo molikuyuulada :

Atamada waa walxo-dhismo ee aad u yar yar ee wax kasta oo nogu wareegsan ey ka soo dhismaan. Atamkaas waxa uu ka soo dhismaa walxo aad u sii yar yar ee loo yaqaano qurubyo (partiklar). Qurubyada leh danabka togan waxaa loo yaqaanaa borotoono (protons), kuwa tabanna waxaa loo yaqaanaa elektaroono (elektrons). Kuwa danabkoodu yahay dhexdhexaad waxaa loo yaqaanaa niyuutaroono (noytrons). Bu,da atamka oo ku taal atamka dhexdiisa waxa ay ka koobantahay borotoono (protons) iyo niyuutaroono (noytrons). Elektaroonadu waxa ay ku wareegaan bu,da.




Atamada aad ayey u yaryihiin mana ku arki karno indhaheena. Sidaa daraadeed waxa aan isticmaalnaa heemaal ama modeel si aan u sawirno sida uu atamka u eg yahay. Heemaal ama model waa hab loo sameeyey si ay ugu ekaato wixii dhabta ahaa. Heemalka ama modeelka inta badan la isticmaalo waa modeel- qolofeed. Model- qolofeedka elektroonada waxa ey ku wareegaan wareegtooyin ujira xudunta heerar kala gadisan. Wareegtada gudaha u xigta waxa ey qaadi kartaa labo elektroon oo kaliya. Wareegtada ku xigta waxa ey qaadi kartaa sideed ee elektroon. Atamka oksejiinta waxa uu leeyahay sideed elektroon, sidaas darteed labo elektroon waxa uu ku wataa wareegtada gudaha u xigta. Lixda soo hartay waxa ey ku jiraan wareegtada ugu koreysa.



Heydorojinta iyo helium waa labada atom ee ugu yar uguna sahlan. Heydorojinta waxa kaliya ey xudunta dhexdeeda ku leedahay hal proton iyo hal noytron, iyo hal elektron ee ku wareega xudunta. Danabka taba nwaxa uu u dhigmaa danabka togan si uu atamka haydorojiin( hydrogen) u noqdo dhexdhexaad. Atamka hiiliyam(helium) waxa uu leeyahay labo borotoon(protons), laboniyuutaroon( noytrons) iyo labo elektroon, waxa uuna wax yar ka weyn yahay atamka heydorojiinta.

Walax waxa ey ka kooban tahay atamo isku mid ah ee loo yaqaano curiye. Tirada borotoonada (protons) ee atamka xudunta dhexdeeda ku leeyahay ayaa og, aamiya nooca uu curiyuhu yahay. Dabiici ahaan waxaa jirta 92 curiye. Curiyaashaas oo dhan waxa ey leeyihiin calaamado loo qori karo. Calaaamada curiyaha waxa ey ka kooban tahay hal ama labo xaraf. Oksejiin (O), haydorojin (H), dahabka (Au) iyo macdanka (Ag) waa tusaale ahaan.

Atamada intooda badan waxa ay ka helaan in ay isla joogaan si wadar ah. Sababta oo ah atam kastaa waxa uu rabaa in uu buuxiyo wareegtada ugu sareeysa. Taas oo atamada ey sameyn karaan iyaga oo elektroonada qeybsanaya. Atamo badan ee qeybsada elektroonada waxa lagu magacaabaa molikiyuul. labo atom oo heydrojiin ah waxa ey qeybsan karaan elektronada. Taas oo labada atom ay ku yeelanayaan labo elektroon wareegtada ugu sareeysa, wareegtadaas oo u buuxsanta. Labadii heydrojiin (H) waxa ey noqonayaan molikiyuul heydorojiin ah (H<sub>2</sub>). Biyaha xitaa waa molikiyuul, kaas oo ka kooban labo atom oo heydrojiin (H) iyo hal atom oo oksejiin (O) ah kadibna ey noqdaan molikiyuul biyo ah (H<sub>2</sub>O).



**Su,aalo ku saabsan atamyada iyo molikuyuulada.**

Geli ereyga ku haboon meesha bannaan. Ereyga ka dooro ereyada wareegga ku jira.

Niyuutaroono	qurubyo	Atamyo	bu,da
Elektaroono	Modeller Heemaal	borotoon	Elektaroonadu

\_\_\_\_\_ waa walxo-dhismo ee aad u yar yar ee wax kasta oo nogu wareegsan ey ka soo dhismaan. Waxa uu ka soo dhismaan walxo aad u sii yar yar oo loo yaqaano

\_\_\_\_\_. \_\_\_\_\_ waa qurubyo leh danab togan , qurubyada leh danabka taban waxa loogu yeeraae \_\_\_\_\_.

\_\_\_\_\_ waa qurubyada dhexdhexaadka ah ee aan lahayn danab. \_\_\_\_\_

waxa ay ka koobantahay borotoono iyo niyuutarono. \_\_\_\_\_ waxa ay ku

wareen bu,da. Waxan isticmaalaa \_\_\_\_\_ si an u musawirro sida ay

atamyadu u egyihiin.

**Ka jawaab su,aalaha soo socda.**

1. Waa maxay atom?
2. Maxa la yiraa waxa ugu yar ee ay walaxi ka samaysantahay?
3. Waa maxay molikuyuul?
4. Waa maxay Curiye?
5. Curiyaha Haydorojiintu imisa borotoon ama niyuraroon ayuu bu,da ku leeyahay?
6. Interta ka raadi curiyaha Oksijiin imisa elektroon ayuu wareegyadiisa ku haystaa?
7. Qor calaamadda ama astaanta curiyaha Haydorojiin iyo oksijiin.